**JAMHUURIYADDA SOMALILAND** — **REPUBLIC OF SOMALILAND**

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA**
**SOLICITOR GENERAL OFFICE**

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE

# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند


| Sannadka 5aad | Cadad Gaar ah | 04/02/2017 |
|---|---|---|


## XEERKA HANTI-DHAWRKA GUUD EE QARANKA
## XEER Lr.76/2016


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2016*

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XERM/249-4525/012017** **DATE….31/01/17**

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0759/012017

## Dhaqan-galka Xeerka Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka Xeer Lr. 76/2016

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiilada, Go'aan Lr. GW/KF-32/713/2017 ee ku taariikhaysan 24/01/2017, ee ay ku ansixiyeen Xeerka Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka Xeer Lr.76/2016;

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Xeerka Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka Xeer Lr.76/2016.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

The Republic of Somaliland | Jamhuuriyadda Somaliland
House of Representatives | Golaha wakiilada
Head Quarter Hargeisa. | Xarunta Hargeisa

Ref GWS/KF-32/713/2017 Date: 24/01/2017

**Ujeedo:- Go'aanka ansixinta Xeerka Hanti-Dhawrka ee Qaranka (Xeer Lr.76/2016)**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

**Markuu arkay:-** Qodobka 53aad 54aad, 55aad, 74aad, 77aad, 78aad 113aad iyo 114aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu Aqoonsaday:-** Waajibaadka Dastuuriga ah ee kasaaran Golaha wakiilada Xisaab Xidhada maaliyada iyo dhamaan arimaha la xidhiidha ee ay ka mid tahay dabagelka iyo ilaalinta Hadntida Qaranka.

**Markuu arkay:-** Baahida loo qabo In la diyaariyo Xeer lagu nidaamiyo habka diyaarinta Xeer uu ku shaqeeyo Hanti-dhowraha Guud ee qaranku si uu u helo awood madax banana oo ku fuliyo waajibaadkiisa.

**Markuu xaqiiqsaday:-** In aanu jirin xeer ku filan isla xisaabtanka iyo baadhitaanada dakhliga dalka iyo sida loo kharash gareeyay inay waafaqsan tahey Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.

**Markuu Ogaaday:-** In loo baahan yahey Hanti-dhawraha guud awood buuxda yeesho si uu u baadho ugana warbixiyo xisaabaadka Dawlada, qabashada dakhliga, bixinta kharashaadka iyo ilaalinta lacagta dawlada iyo in si wax ku ool ah loo adeegsado lacagtaas iyo inuu kor u qaado koboca dhaqaale iyo hufnaanta Maaliyadeed ee Qaranka.

**Markuu tixgaliyay:-** Doodihii, aragtiyihii iyo afkaartii qiimaha lahayd ee qaybaha kala duwan ee bulshada sida, Aqoonyahanada, sharciyaqaanada, iyo mudanayaashu ka soo jeediyeen si loo helo xeer Hanti-dhowr oo ku dhisan aqoon lagana wada qayb qaatay doodiisa.

Website: www.somalilandparliament.net

| | |
|---|---|
| **Markuu u Codeeyay:-** | Ansixinta Xeerka Maamulka Maaliyada Qaranka ee JSl Kal-fadhigii **32aad** fadhigiisi **9aad** taariikhduna aheyd **13/12/2016** oo ay goob joog ahaayeen **(42)** Mudane oo ka mida ah mudanayaasha Golaha Wakiilada. |

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah **(35)** oo gacan taag ah ku ogolaaday Xeerka Hanti-Dhawrka Qaranka (**Xeer Lr.76/2016**) halka **afar** (4) mudane ka diideen, laba (2) mudanena ka aamuseen, Guddoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

**Allaa Mahad Leh**

| | |
|---|---|
| C/risaaq Siciid Ayaanle | Baashe Maxamed Faarax |
| Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada | K/s Gudoomiyaha Golaha Wakiilada |

**December 2016**

# GOLAHA WAKIILADA JSL.

**Markuu Arkay: -** Qodobka $53^{aad}$ $54^{aad}$, $55^{aad}$, $74^{aad}$, $77^{aad}$, $78^{aad}$ $113^{aad}$ iyo $114^{aad}$ ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu Aqoonsaday: -** waajibaadka Dastuuriga ah ee kasaaran Golaha wakiilada Xisaab Xidhka maaliyada iyo dhamaan arimaha la xidhiidha ee ay ka midka yihiin dabagelka iyo ilaalinta Hantida Qaranka.

**Markuu Arkay:** - Baahida loo qabo in la diyaariyo xeer lagu nidaaminayo habka diyaarinta Xeer uu ku shaqeeyo Hanti-dhowraha Guud ee Qaranku si uu u helo awood madax banana oo ku fuliyo waajibaadkiisa.

**Markuu Xaqiiqsaday:** - In aanu jirin xeer ku filan isla xisaabtanka iyo baadhitaanada dakhliga dalka iyo sida loo kharashgareeyay inay waafaqsan tahay Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka.

**Markuu Ogaaday:** - In loo baahan yahay Hanti-dhowraha guud awood buuxda yeesho si uu u baadho ugana war bixiyo xisaabaadka dawlada, qabashada dakhliga, bixinta kharashaadka iyo ilaalinta lacagta

dawlada iyo in si wax ku ool ah loo adeegsado lacagtaas iyo inuu kor u qaado kobaca dhaqaale iyo hufnaanta Maaliyadeed ee Qaranka.

**Markuu Tixgeliyay:** - Doodihii, aragtiyihii iyo afkaartii qiimaha lahayd ee qaybaha kala duwan ee bulshada sida, Aqoonyahanada, sharciyaqaanada iyo mudanayaashu ka soo jeediyeen si loo helo Xeer Hanti-dhowr oo u dhisan aqoon lagana wada qayb qaatay doodiisa.

**WUXUU ANSIXIYAY**

## Xeerka Hanti-dhowrka Guud ee Qaranka
## Xeer Lr. 76/2016

# QAYBTA 1AAD

# GOGOLXAADH

## Qodobka 1aad

## Magaca Xeerka

Xeerkan magiciisu waa **'Xeerka Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka Soomaaliland' Xeer Lr. 76/2015** waxa uu nasakhayaa (**Xeer Lr. 5/98).**

## Qodobka 2aad

## Ujeeddada Xeerka

Ujeeddada xeerku waxa weeye: -

**a**) In la abuuro xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka oo ah hay'ad jirta oo madaxbannaan.

**b)** Si loo hubiyo in Qaranku leeyahay Hanti-dhawre Guud oo leh shaqooyinka muhiimka u ah, xasaanada iyo madax banaanida.

**c**) Si uu u qabto baadhista madaxa banaan ee dawladda iyo hay'addaheeda la xidhiidha.

**d)** Si loo xoojiyo doorka kor joogto ee Guddiga Ilaalinta iyo Dabaglka Hantida Qaranka ee Golaha Wakiilada JSL.

**e)** In uu xoojiyo jiritaanka Xafiiska Hanti-dhawrka ee hada jira.

## Qodobka 3aad

## Eray-Bixin

1. Si loo fahmo macnaha guud ee Xeerkan, erayada soo socdaa waxay yeelanayaan fasiraadda ku hor qoran: -

    a. **'Sarkaal Xisaabeed'** waxa loola jeedaa qof kasta oo u igmadey shaqadaas Xoghayaha Qasnadu ama sharci oo loo xilsaarey masuuliyadda shaqada xisaabaadka ama dakhli, kharash iyo adeeg kasta oo lacag loogu qoondeeyay.

b. **“Wasiirka ku habboon”** waxa loola jeedaa marka laga hadlayo laan dawladeed, wasiirka leh awoodda ku xusan xeerka ee khuseeya hay’addaasi dawladeed.

c. **’Xeerka Qoondada”** waxa loola jeedaa xeerka qoondeeya dakhliga khuseeya sanad maaliyadeed oo loogu talo galay adeegyada uu cayimay Xeerkaasi.

d. **‘Xafiis Hanti-dhawr”** ama **“Hay’ada Sare ee Hanti-dhawrka”** waxaa loola jeedaa ***“Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka’***.

e. **‘Qoraal”** waxa loola jeedaa diiwaan kasta oo macluumaad sida:-

   I. Wax kasta oo ah qoraal ama sawir ku yaalo;
   II. Wax kasta oo ay ku jiraan astaamo, tirooyin, calaamado, shaanbad qallalan, ama maqnaanshiiyo (perforations) micne u leh qofka turjumisteeda khibrad u leh.
   III. Shey kasta oo ay jabaq, muuqaal ama qoraal dib loo soo saari karo ama laga soo dheegan karo iyada oo la isticmaalayo ama aan la isticmaalayn shay kale.

f. **“Kharash”** waxaa loola jeedaa bixinta lacagta dawladda ee uu Golaha Wakiiladu ku ansixiyay xeer qoondo ama qaraar/go’aan, ama Wasaaradda Maaliyaddu, ama Dastuurku jideeyey.

g. **“Baadhis Xisaabeed”** waxa loola jeedaa shaqada uu qabtey Hanti-dhawraha Guud si uu u sameyso aragti xagga ansaxsanaanta iyo runimada xisaabaadka dawladda ee Jamhuuriyadda Soomaaliland ah; iyo hufnaanta, nidaaminta iyo baadhista in lacagta loo isticmaalay sida ugu sax roon ee ay maareeyaan hay’adaha dawaladdu.

h. **‘Maamulaha ama Sarkaalka’’** waxa loola jeedaa qof kasta oo shaqaale u ah dawladda oo maamula qeyb, waax ama xafiis dawladeed ka hawlgala,

i. **“Maamulaha Qabta Dakhliga’’** waxa loola jeedaa sarkaalka uu Xoghayaha Maaliyaddu u igmaday hawshaasi ee haya masuuliyadda in uu qiimeeyo, ururiyo isla markaana xisaabiyo dakhliga.

j. **“Guddiga Ilaalinta Hantida Qaranka”** waxa loola jeedaa Guddiga Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka Golaha Wakiilada ee lagu sameeyay xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada.

k. **“Xisaabaadka Dawladda’’** waxaa loola jeedaa xisaabaadka sida: -

   I. Dhammaan waaxaha dawladda dhexe iyo dawladaha hoose.
   II. Dhammaan hay’addaha ay dawladdu ku leedahay hanti ay maamusho.
   III. Dhammaan mashaariicda lagu maalgaliyo qaab dayn ahaana ama deeq ay bixisay dawlad qalaad ama urur caalami ahi.

l. **“Hay’addaha Dawladda’’** waxa loola jeedaa dhamaan hay’addaha dawladda dhexe iyo dawladaha hoose iyo dhammaan ururada ay dawladdu ka leedahay dano maamuleed, waxana ka mid ah maxkamadaha, Jaamacadaha, iyo shirkad kasta oo dawladeed ama machad lagu abuuray Xeer.

m. **“Lacagta Dawladda’’** waxaa loola jeedaa lacagta dawlada ee ay ku jirto dhammaan lacagta uu yeesho ama u qaybiyo hay’addo dawladeed iyo lacagta ay ururiyaan shakhsiyaad rayid ahi

haddii uu sidaasi farayo xeer waxaana ka mid ah lacagta dawladda: -

I. Dhammaan lacagta ay hesho hay'ad dawladeed isha ay doontaba ha ka timaadee;
II. Dhammaan lacagta laga helo hay'ad dawladeed ee ay ka hesho hay'ad aan dawlad ahayn;
III. Dakhliga iyo amaanada ama lacagaha kale ee loo hayo si ku meel gaadh ah ama si kalaba ee uu hayo sarkaal ku hawl galaya awooddiisa rasmiga ah, kali ahaan ama isaga oo uu weheliyo qof kasta oo kale, ha noqdo sarkaal ama yuu noqone.

n. **"Dakhliga"** waxa loola jeedaa dhammaan khidmaha laga bixiyo wadooyinka iyo buundooyinka (tolls), cashuuraha, waxyaabaha la soo rogo, tacriifad waxyaabaha lagu waajibiyo, fiiga, ganaaxa [penalties], xukunadda la wareegida, kirooyinka, cashuuraha waajibay, waxa laga faa'iidey iibka, iyo dhammaan Waraaqaha kale ee lacag qabashada ee dawladda (il kastaba ha ka yimaadaane) taas oo Golaha Wakiiladu uu awood u leeyahay in uu qoondeeyo oo ay ka mid yihiin waxii laga dhaliyo dhammaan daymaha la ururiyay iyo dhammaan deeqaha iyo hadyadaha ay dawladdu hesho.

2. Tixraacyada xeerkani ee waaxaha waxa ka mid ah tixraacaha Wasaaradda ama xafiis Gobol.

## QAYBTA II
## XAFIISKA HANTI-DHAWRKA QARANKA IYO HANTI-DHAWRAHA GUUD
### <u>Qodobka 4aad</u>
### <u>Aasaasidda Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka</u>

.

1. Xafiiska Hanti-dhowrka Qaranku waa hay'ad

dawladeed oo leh jiritaan abadi ah iyo shaanbad rasmi ah, magaceeda hay'addeed baa lagu dacwayn karaa waxna ay ku dacwayn kartaa, waxana shaqadeeda lagu maamuli doona Qodobada Dastuurka, waxa ay qaban kartaa, heli kartaa, ama ku dhici kara wax kasta oo ay qaban karto, heli karto, ama ku dhici kara hay'ad jirta oo madax banaan.

2. Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka waxa hogaamiya Hanti-dhawraha Guud.

## Qodobka 5aad

## Magacaabista Hanti-dhawraha Guud.

**1)** Iyada oo la raacayo Qodobka 114aad ee Dastuurka Somaliland waxa magacaabaya Hanti-dhowraha Guud Madaxwaynaha waxaana ansixinaya Golaha Wakiilada. Waxaanay ku ansixinayaan kala badh iyo hal.

**2)** Marka ay ansixiyaan Golaha Wakiiladu, qofka la magacaabay waxa xilka u dhaarinaya Gudoomiyaha Maxkamada Sare inta aanu xilka la wareegin.ka hor

**3)** Ansixinta Golaha Wakiilada ee Hanti-dhawraha Guud waa inay ku dhacdaa muddo aan ka badnayn saddex bilood, oo ka bilaabmaysa maalinta uu madaxweynuhu u soo gudbiyo golaha wakiilada, mana bannaana in masuulka xilkaasi loo magacaabay uu xilka sii qabto iyadoo aan la ansixin in ka badan muddadaasi".

**4)** Si loo cayimo qof u qalma xilka Hanti-dhawraha Guud, Madaxweynuhu waxa uu hubinayaa in musharaxu leeyahay sifooyinka hoos ku xusan":-

a) Waa inuu yahay muwaadin reer Soomaaliland ah;
b) qof ku haboon una qalma khibradna u leh jagadaasi
c) Waa in aan hore dalna ugu xukumin wax danbi ah oo la xidhiidha tuugo, khiyaamo ama aamin daro;
d) Waa in aanay ku baaqan dhammaan waajibaadkiisa cashuureed ee lagu jideeyay xeerarka Somaliland.

**5)** Marka la magacaabo, Hanti-dhawraha Guud: Ma qaban karo Jago siyaasadeed ama kuma yeelan karo door rasmi ah si toos ah iyo si dadban midnaba hay'adkasta oo aan dawladda ka mid aheyn ama urur xirfadeed ama hawl kasta oo ay faa'iido ka soo gali karto isaga/iyada iyadoo ay u sahashay awooda iyo jagada Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranku;

**6)** Waa inuu ka baxaa ballan kasta ama shaqo kasta oo uu hore u qaaday, taasoo loo malayn karo inuu ka dhalanaayo iska hor imaad daneed (conflict of interest).

**7)** Hanti-dhawraha Guud wuxa uu noqon karaa sarkaal la shaqeyn kara ama ka qeybgala hawlaha mihnadeed ee ururada baadhista ama xisaabinta iyo ururada dajiya qaab xisaabeedka caalamiga ah ku was oo shaqadoodu aanay ka hor imanayn doorka iyo hawlgalada xafiiska Hanti-dhawrka.

## Qodobka 6aad
## Awooddaha Hanti-dhawraha Guud.

1. Hanti-dhawraha Guud ee sida dhamaystiran loo soo magacaabey waxa uu noqon doonaa Madaxa Xafiiska Hanti-dhawraha Qaranka iyo hanta-dhawrka dibadeed ee waaxaha dawladda.
2. Waxa uu awood buuxda u leeyahay in uu guto masuuliyadaha Hanti-dhawrka dibadeed si uu u baadho ugana war bixiyo Xisaabaadka Dawladda, iyo qabashada, kharash bixinta, iyo ilaalinta lacagta dawladda iyo in uu kor u qaado koboca dhaqaalaha, hufnaanta iyo in si wax ku ool ah loo adeegsado lacagtaasi.
3. Marka uu gudanayo hawlahaasi, Hanti-dhawraha Guud kama amar qaadan doono qofna ama haay'adna;
4. Hanti-dhawraha Guud waxa uu noqon doonaa sarkaalka xisaabeed isagoo ah sarkaalka fulin ee ugu sareeya Hanti-dhawrka Qaranka.

5. Hanti-dhawrka Guud wuxuu matalayaa Jamhuuriyada Somaliland xubinimada Ururka Caalamiga ah ee hay'adaha Hanti-dhawr ee Sare (INTOSAI), Hanti-dhawrayaasha Guud ee Dalalka Barwaaqo-sooranka, ururada kale ee caalamiga ah ee baadhis ama xisaabaad iyo ururada dajiya qaab xisaabeedka caalamiga ah (standard setting bodies)".

**Qodobka 7aad**
**Madax Banaanida Hanti-dhawraha Guud**

1. Hanti-dhawraha Guud wuxuu u dhaqmi doonaa si madax bannaan marka uu gudanayo shaqooyinkiisa, waajibaadkiisa iyo awoodihiisa.
2. Hanti-dhawraha Guud waxa uu yeelanayaa xasaanad in lagu soo dacweeyo marka uu si caadi ah u wato waajibaadkiisa waqtiga uu xilka hayo ama marka uu xilka ka dago.
3. Inta aanu xilka la wareegin, Hanti-dhawraha Guud waxa dhaarinaya Gudoomiyaha Maxkamada Sare isaga oo balanqaadaya in uu u guto sidaacad ah oo dhexdhexaada waajibaadka xafiiska, uuna u hogaansami doono xeerarka Soomaaliland, isla markaana kor u qaadi doono Dastuurka.
4. Si uu u guto hawlihiisa shaqo, Hanti-dhawraha Guud, isaga oo raacaya Qodobada Xeerkan, waxa uu samayn karaa wixii uu xeerku u ogol yahay, waxaanu gali karaa hawl kasta oo lagama maarmaan u ah hubinta hufnaanta shaqooyinka waaxaha qaranka: -

   a) Magacaabista shaqaalaha uu u arko lagama maarmaan in ay u yihiin gudashada hawlahan;

   b) In uu aasaaso isla markaana fuliyo nidaam dhan iyo siyaasadii lagu maamuli lahaa shaqaalaha

   c) Samaynta nidaam koombiyuutareysidh ah ama casriya oo looga dan leeyahay ururinta, kaydinta, baadhista, iyo in dib loo isticmaali karo xogta khuseysa.

d) Baahinta habraacyada lagu maamulo hawlaha baadhiseed.

## Qodobka 8aad
## Shuruudaha Shaqo ee Hanti-dhawraha Guud.

Iyada oo la raacayo Qodobka 9aad, mushaharka, gunada hawlgab, xuquuqda iyo shuruudaha shaqo ee kale ee Hanti-dhawraha Guud waxey isku mid noqonayaan Gudoomiyaha Maxkamada Sare.

## Qodobka 9aad
## Muddo Xileedka Hanti-dhawraha Guud

Iyada oo loo eegayo gaadhida da'da hawlgabka sharciga ah, Hanti-dhawraha Guud waxa uu xafiiska hayn doonaa muddo dhan (5) shan sanno oo loo cusboonaysiin karo hal mar.

## Qodobka 10aad
## Is-casilaada Hanti-dhowraha Guud

Haddii ay dhacdo in Hanti-dhawraha Guud ee la doortey is casilo sabab kasta darteed, waa in uu bixiyaa ogeysiin ugu yaraan saddex bilood ka hor xiliga uu ugu talo galay shaqo ka tagista la soo jeediyey si Madaxweynaha iyo Golaha Wakiiladu u helaan muddo ku filan oo ay kusoo xulaan badalkiisa oo leh khibrad iyada oo la raacayo shuruudaha Qodobka 8aad ee Xeerkan.

## Qodobka 11aad
## Xil ka-qaadista Hanti-dhawraha Guud

1. Hanti-dhawraha Guud waxaa xilka lagaga qaadi karaa oo kaliya sida ku cad Qodobada 114aad ee Dastuurka iyo Qodobada Xeerkan.

2. Hanti-dhowraha Guud waxa xilka xafiiska lagaga qaadi karaa karti la'aan uu gudan kari waayo hawlahii xafiiskiiska (taas oo ka dhalatay hawl gab dhinaca jidhka ah ama maskaxda ah ama sabab kasta oo kale waxa ay doontaba ha noqotee) ama anshax daro.
3. Hanti-dhawraha Guud waxa xafiiska ka qaadi kara Madaxweynaha marka sababta xil ka qaadistiisa xafiiska ay ku raacaan Gudidda garsor ee Golaha Wakiiladu ku magacaabayo farqada 4aad xaraf (a) ee qodobkan gudiddaasina ay kula taliso Golaha Wakiilada in Hanti-dhawraha Guud laga qaado xafiiska sabab awood daro ama anshax daro.
4. Haddii uu Gudoomiyaha Gudidda Ilaalinta Hantida Qaranku uu ku talo bixiyo in la baadho eriga Hanti-dhawraha Guud ee qodobkan ku xusan in la baadho: -

   a) Golaha Wakiiladu wuxuu soo magacaabayaa gudi garsoor oo ka koobnaaneysa Gudoomiye iyo in aan ka yareyn laba xubnood oo kale, oo laga soo xuley Golaha Wakiilada marka ay la tashadaan Gudiga Cadaalada xubnaha soo qabtay ama haya xafiis garsoore ka tirsan Maxkamadda Rafcaanka ama Maxkamada Sare kuwaas oo u qalma loona ogolyahay inay noqdaan qareen kuna soo shaqeeyaan xilkaas muddo aan ka yarayn sida uu dhigayo Xeerka Nidaamka Garsoorku.

   b) Gudiddaasi garsoor waxa ay baadhi doonaan arrinka una warbixin doontaa xaqiiqooyinka Golaha Wakiilada waxana ay kala talin doonaan in Hanti-dhawraha Guud xilka laga qaado iyo in kale.

5. Qodobada Xeerka Nidaamka Garsoorka ayaa loo adeegsan doonaa wixii xidhiidh la leh gar maqalka lagu xusay Qodobkan.
6. Haddii xil ka qaadista xafiiska Hanti-dhawraha Guud loo gudbiyo Gudidda garsoor sida ku cad Qodobkan, Madaxweynuhu, isagoo raacaya talada

Golaha Wakiilada wuxuu ka xayiri karaa sii wadista hawlaha xafiiska, xayiraadaasina waxa ay joogsan doontaa in ay sii socoto mar kasta oo Gudidda garsoor kula taliyaan Madaxweynaha in masuulka aan laga eryin xafiiska.

**Qodobka 12aad**
**Ku-xigeenka Hanti-dhawraha Guud.**

1. Iyada oo la raacayo qodobada xeerkan, qof ayaa loo magacaabi doonaa ama loo dalacsiin karaa in uu noqdo Ku Xigeenka Hanti-dhawraha Guud kaasoo gudanaya hawlaha uu Hanti-dhawraha Guud u igmado.
2. Ku-xigeenka Hanti-dhawraha Guud waxa u dhaarinaya xafiiska Gudoomiyaha Maxkamada Sare ka hor inta aanu bilaabin shaqadiisa/shaqadeeda.
3. Ku-xigeenka Hanti-dhawraha guud:-
   a) Wuxuu noqonayaa Ku-simaha Hanti-dhawraha Guud xiliyada uu xanuunsanayo, shaqada laga joojiyo/xayiro ama maqnaanshaha Hanti-dhawraha Guud, iyo xiliyada uu banaanaado xafiiskaasi,
   b) Marka shaqada laga joojiyo/xayiro ama la eryo Hanti-dhawraha guud ku-xigeenku wuxuu yeelanayaa awoodii Hant-dhawraha, waxaanu gudanayaa hawlaha Hanti-dhawraha Guud waxaanu qaadanayaa mushahar la mid ah kii la siinayey Hanti-dhawraha Guud.

4. Fal kasta ama wax kasta oo uu sameeyey ku-xigeenka Hanti-dhawraha Guud isagoo isticmaalaya awood gudanayana hawlaha Hanti-dhawraha Guud waxa ay yeelaneysaa saameyn la mid ah sidii hawl uu qabtay Hanti-dhawraha Guud.

5. Fal kasta ama wax kasta oo xeer farayo in la qabto oo xidhiidh la leh Hanti-dhawraha Guud waxa loo qaadan doonaa in si hufan loo qabtay marka laga hadlayo ku-xigeenka Hanti-dhawraha Guud haddii Ku-xigeenka

Hanti-dhawraha Guud uu ku sime ahaan ku hayo xafiiska Hanti-dhawraha Guud.

6. Ku-xigeenka Hanti-dhawraha guud marka uu yahey ku-simaha xafiiska Hanti-dhawraha Guud, wuxuu leeyahey Xasaanadda iyo madaxbanaanida Hanti-dhawraha Guud.

## QEYBTA III

## MAAMULKA, SHAQAALAHA IYO XILALKA KALE EE XAFIISKA HANTI-DHAWRAHA QARANKA

### Qodobka 13aad
### Abuuridda Komishanka Hawlaha Hanti-dhawrka

Iyada oo la raacayo Qodobada Xeerkan, Xafiiska Hanti-dhawrka g uud ee Qaranku waxa uu yeelanayaa gudi maamul oo loo yaqaan Komishanka Hawlaha Hanti-dhawrka iyada oo Xeerkani dhexdiisa loogu yeedhayo “Komishanka”.

### Qodobka 14aad
### Xubinnimada Komishanka.

Komishanku waxa uu ka koobnaanayaa: -

a. Gudoomiye iyo afar xubnood kale oo uu magacaabo Madaxweynahu, oo ay shardi tahay in ay ansixiyaan Golaha Wakiiladu;
b. Hantdhawraha Guud;
c. Agaasimaha Guud, Hay’adda Shaqaalaha Dawladda ama wakiilkiisa kaas oon ka hoosayn doonin darajo u dhiganta Agaasime Dawladeed.

### Qodobka 15aad
### Xoghayaha Komishanka.

Hanti-dhawraha Guud wuxuu keeni doonaa xoghayaha Komishanka qof aan darajo ahaan ka hooseynin agaasime waaxeed oo ka tirsan Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka.

**Qodobka 16aad**
**Ka Eryida Xafiiska Xubin ka mid ah Komishanka.**

Xubinta ka mid ah Komishanka ee aan aheyn Hanti-dhawraha Guud iyo Gudoomiyaha Haay'adda Shaqaalaha waxa ka eryi kara xafiiska Madaxweynaha, Isagoo cuskanaya Talo-bixinta Golaha Wakiilada, waxana lagaga eryi karaa awood dari ka dhalatay hawlgab xaga maskaxda ama jidhka ah ama anshax daro.

**Qodobka 17aad**
**Hawlaha Komishanka Hanti-dhawrka Qaranka**

Komishanku waxa ay qabanayaan dhammaan arrimaha shaqo qorista, dalacsiinta, guno hawl gabka, iyo anshax marinta xubanaha shaqaalaha xafiiska Hanti-dhawraha Qaranka, iyo Komishanka.

**Qodobka 18aad**
**Magacaabista Shaqaalaha**

1. Iyadoo la raacayo codsiga ka yimid Hanti-dhawraha Guud ee sheegaya muga shaqaalaha loo baahan yahey si uu si hufan u guto hawlaha xafiiska Hanti-dhawraha Guud, Komishanku waxey qorayaan shaqaalahasi Xafiiska Hantdhawraha Qaranka.
2. Codsigaasi waxa lagu fulinayaa laguna gudanayaa waqti macquula sida uu codsado Hanti-dhawraha Guud.
3. Komishanku Waxa ay magacaabayaan saraakiisha iyo shaqaalaha kale ee aan ahayn Hanti-dhawraha Guud.
4. Iyadoo la raacayo Qodobkan, Komishanku waxey wada tashi la yeelanayaan Hay'adda Shaqaalaha Dawladda arrimaha shaqa siinta, balse go'aanka arimahaasi la xidhiidhaa waxa samaynaya Komishanka Hanti-dhawrka Qaranka.
5. Dhammaan magacaabista shaqaalaha loo magacaabo jagooyinka Komishanka si balaadhan ayaa loo xayeysiinayaa waxaana laga qaadayaa imtixaano

qoraal ah iyo wareysiyo si loo hubiyo helitaanka, tartamayaal u qalma oo takhasus u leh.

**Qodobka 19aad**
**Ka Reebidda Haay'ada Shaqaalaha Dawladda**

Shaqaalaha/Hawlwadeenada xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka waxa loo tixgalinayaa saraakiil dawladeed laakiin kamana mid aha lagumana dhaqayo xeer hoosaadyada, wareegtooyinka, iyo xeer nidaamiyayaasha kale ee ay faafiyeen Haay'ada Shaqaalaha Dawladdu.

**Qodobka 20aad**
**Dalacaada Shaqaalaha**

1. Hanti-dhawraha Guud waxa uu u soo jeedinayaa Komishanka dalacaada, shaqaalaha xafiiskiisa kuwaas oo ah qaar u qalma dalacsiintaasi.
2. Ma jireyso xubin ka mid ah shaqaalaha oo uu Hanti-dhawraha Guud ku soo talo bixiyay, xubintaasi oo koobsatay dhammaan shuruudaha lagu dalaco oo loo diidi doono inuu dalacaa ama dalacaadaasi si aan daruuri ahayn dib loogama dhigi karo.

**Qodobka 21aad**
**Shuruudaha Shaqo iyo Arrimaha kale ee Shaqaale**

1. Komishanku wuxuu: go'aaminayaa shuruudaha iyo macluumaadka/xaaladaha adeeg ee saraakiisha iyo shaqaalaha xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka, een ahayn Hanti-dhawraha Guud;
2. Maaraynayaa arrimaha la xidhiidha anshax marinta shaqaalaha xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka, sida uu u soo gudbiyo Hanti-dhawraha Guudi, iyo
3. Maaraynayaa dhammaan arrimaha shaqaaleynta ee xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka iyo Komishanka, taas oo ay ku jirto arrimaha la xidhiidha gunada hawlgabka, arrimaha hawlgabka iyo xuquuqda, iyo waxyaabaha la xidhiidha shuruudaha shaqo iyo anshax marinta shaqaalaha Komishanka.

4. Shaqaalaha Komishanku waxa ay ku dhaaran doonaan dhaarta sir haynta marka ay gudanayaan shaqooyinkooda.

## Qodobka 22aad
## Shaqaaleynta Qandaraaslayaasha

Isaga oo gudanaya waajibaadkiisa, Hanti-dhawraha Guud waxa uu la macaamili karaa adeegyada askhaasta si gaar ah ugu takhasusay xisaabaadka ama shirkadaha kale si ay heshiis ahaan ugu qabtaan hawlo xadidan oo ay ku jiraan kuwa looga baahanyahay sabab ah in ururo caalami ahi dhinac ka yihiin heshiiska, balse dhammaan aragtida baadhiseed (audit opinion) waxa ay ahaanayaan kuwa Hanti-dhawraha Guud.

## Qodobka 23aad
## Qandaraas siinta Shirkadaha Hanti-dhawrka

Hanti-dhawraha Guud waxa uu awood buuxda u leeyahay in uu si gaar ah heshiis sharci ula galo shirkadaha bixiya adeegyada hanti-dhawraha in ay baadhis ku sameeyaan, qiimeeyaan dibna u eegaan barnaamijyada iyo mashaariicda ay fuliyaan hay'addaha dawladdu, Shirkadaha qabta adeegyada Hanti-dhawriseed waxa ka reeban in ay siiyaan hay'addaha dawladda adeeg Hanti-dhawr marka laga reebo sida xeerkan ku cad.

## Qodobka 24aad
## Hagayaasha Qandaraas Bixinta

Marka heshiis lala galayo khubaro farsamo yaqaan ah ama Hanti-dhawrayaal shirkad gaar loo leeyahay, Hanti-dhawraha guud wuxuu qaadayaa talaabooyinka soo socda: -

a. Shaqo qorista iyo dajinta shuruudaha shaqo qoriseed iyo xuquuqdooda.

b. Waxa uu la tashanayaa Komishanka Adeega Hanti-dhawrka;
c. Bixinta qandaraaska.
d. Cayimayaa qaabka hawsha loo baahanyahay loo dhamays tiri doono;
e. Ansixinayaa qorshaha baadhiseed iyo nidaamyada baadhiseed (baaxada iyo habka) (scope and methodology) hawshaasi leedahay;
f. Dib u eegayaa waraaqaha shaqo iyo warbixinaha ay diyaariyeen qandaraasluhu;
g. Haduu u arko in ay tahay lagama maarmaan in la dhamays tiro shuruudaha heshiiska, waxa uu dalbanayaa shaqo dheeraad ah.

## Qodobka 25aad
## Waajibaadka iyo Shuruudaha Qandaraaslayaasha

Marka ay gudanayaan masuuliyadahooda, dadka heshiiska kula jira Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranku waxa looga baahanyahay in ay raacaan nidaamka baadhiseed ee uu Hanti-dhawraha Guud in la isticmaalo ansixiyay waxana ay raacayaan siyaasadaha iyo nidaamyada Xafiiskaasi.

## Qodobka 26aad
## Muddada Heshiiska ee Shirkad hanti-dhowr

Shirkadaha Hanti-dhawrada waxa ay u adeegi karaan hay'add ka mid ah muddo saddex (3) sanadood ah, iyada oo loo cusboonaysiin karo saddex sano oo kale hal mar.

## Qodobka 27aad
## Xadidaadda Adeegyada ee ay Bixiyaan Shirkadaha Hanti-dhawrku

Shirkadaha hanti-dhawrka ama haay'daha la bahda ahi ma siin karaan adeegyo kale, oo ay ku jirto talo cashuureed ama talo xisaabeed ama adeegyada la talin maamul, cid ay ugu adeegeen Hanti-dhawr dibadeed ahaan.

**Qodobka 28aad**
**Awood Siinta Shirkadaha Baadhista**

Shakhsiyaadka ama shirkadaha ku adeegaya heshiis ay la galeen Hanti-dhawrka Guud iyaga oo waafaqaya shuruudaha heshiiskooda, waxa ay u fulin doonaan waajibkooda heshiis qaab mihnadnimo leh, iyaga oo raacaya xeerka anshaxa ee mihnadooda, sidoo kale, waxa ay leeyihiin awood iyo masuuliyad la mid ah shaqaalaha Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka marka laga hadlayo in ay helaan macluumaadka, soo saarida qoraalada, baadhida xisaabsocotada baananka iyo daah furidda macluumaadka.

**Qodobka 29aad**
**Ka war-celinta Adeegyada La Qandaraasey**

Marka uu heshiis la galo xafiiska hanti-dhowku shirkadaha Hanti-dhawrka si loo suurogaliyo shuruudaha qaadhaan bixiyayaasha, ururada Caalamiga ah iyo shakhsi shisheeye khidmada adeegyada qandaraaska lagu bixiyay waxa bixinaya wakaaladda loo qabtay adeegaasi.

**Qodobka 30aad**
**Fiiga Ka-war celinta ee Hanti-dhawraha Guud**

Haddii Hanti-dhawraha Guud uu siiyo adeeg Hay'addaha aan ahayn hay'adda dawladda dhexe ama mashruuc dibad laga maalgalinayo, waxa uu/ay ku dalici doonaa fiiga kawar celinta fiigaasina waxa lagu dari doonaa Sanduuqa Dakhliga Guud.

**QEYBTA IV**

**BAADHISTA IYO WARBIXINTA**

**Qodobka 31aad**
**Baadhista Hay'addaha Dawladda**

1. Hanti-dhawraha Guud waa Hanti-dhawrka dibadeed ee hay'ad kasta oo dawladeed wuxuuna leeyahey masuuliyadda iyo awood uu ku guto kuna qabto baadhis xisaabeed, baadhis wax qabad iyo baadhis in nidaamka la raacay (financial, compliance, and performance audits).
2. Isticmaalka khadka doogada ah waxa loo ogolyahay oo kaliya Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka. Waaxaha Maamula Maaliyadda ee hay'addaha dawladdu sinaba uma isticmaali karaan khadka doogada ah.
3. Marka uu fulinayo Baadhista Maaliyadeed, baadhista wax qabad, iyo Baadhist waafaqsanaanta nidaamka iyo tan xisaabeed, Hanti-dhawraha Guud waxa uu baadhayaa qaabka uu u arko lagama maarmaan xisaabaadka iyo saaraakiisha xisaabeed iyo maamulayaasha qabta dakhliga iyo dhammaan shakhsiyaadka lagu aaminay ururinta, helida, gacan ku haynta, soo saaridda, iibka iyo kala wareejinta ama keenida wax shaanbado ah, damaanado ah, bakhaaro ah ama hanti kale oo dawladeed ah iyo saraakiisha uu u arko lagama maarmaan. Marka uu gudanayo baadhistiisa/teeda, Hanti-dhawraha guud wuxuu hubinayaa: -
    a. In diiwaanada xisaabta si daacad ah oo nidaamsan loo isticmaalay;
    b. In shuruucda, nidaamyada iyo dabar gudeedyadu (nidaamka hubinta guduhu) ay ku filan yihiin in ay horseedaan ilaalin wax ku ool leh oo qiimeeyn ah, ururin iyo qoondeyn sax ah oo dakhli leh;
    c. Dhammaan lacagaha la kharashgareeyey ee lagu dalacay xisaabta qoondada in loo isticmaaley ujeedadeedii ama ujeedooyinkii uu Golaha Wakiiladu ku ansixiyay iyada oo fiiro loo lahaa hubinta dabar gudeed (nidaam hubin gudeed) oo wax ku ool ah.
    d. Dabar gudeedyada (nidaamka hubinta gudaha), xeer nidaamiyayaasha, nidaamyada la sameeyey ee la raacay in ay ku filan yihiin in si ku filan

loo badbaadsho ilaalinta bakhaarada iyo hantida kale ee dawladeed.

e. Marka Xafiiska Hanti-dhawraha Guud wado Baadhitaanada Maaliyadeed, Baadhitaanada sharciyeed iyo Baadhitaanada Hawleed, Haddii Xafiiska Hanti-dhawraha Guud la kulmo ama daah rogo in Musuqmaasuq iyo Wax is-daba-marini dhacday, Xafiiska Hanti-dhawraha Guud waa in uu xidho cida eeda leh, isagoo raacaya Qodobka 24aad ee Xeerka Ciqaabta Guud, isla markaana Xafiiska Hanti-dhawraha Guud wuxuu eeda ku gudbinayaa 48 saacadood gudahood, si waafaqsan Qoddobka 32aad ee xeerkan.

4. Marka uu fulinayo baadhista wax qabad ama baadhista in lacagta loo isticmaalay sida ugu saxroon, (value for-money audits) Hanti-dhawrahaa Guud waxa uu eegi doonaa illaa iyo xadka hay'adda dawladdu ay lexojeclo khayraadkeedii u adeegsadeen isla markaana ay ku wado hawlaheedii si leh (madhxin leh) hufan oo wax ku ool ah (economically, efficiently, and affectively).

5. Marka uu Hanti-dhawraha Guud uu ka warbixiyo wax kasta oo qarsoodi ah, sir ah, ama macluumaad la qariyo: -

a) Waa in uu dhug u yeeshaa nooca gaarka ah macluumaadka,

b) Ka dib marka uu la tashado Madaxweynaha, Wasiirka Maaliyada, iyo Wasiirka masuulka ka ah macluumaadka warbixinahan, waxa uu xadidi karaa warbixinta Hanti-dhawrka ee isla warbixintan ilaa heerka loo baahan yahey.

6. Farqada 4aad ee Qodobkani kama joojinaso in daaha laga furo baadhis kasta ee Hanti-dhawr oo uu sameeyo Hanti-dhawraha Guud oo lagu isticmaalay kharash kasta oon la ogolaan ama aan caadi ahayn ama wixii kale ee aan caadiga aheyn ama fal danbiyeed ah ee khuseeya hawlaha xisaabaadka ee wasaarad ama hay'ad dawladeed ka masuul ah, balse daah furkaasi laguma

dari doono daahfurka xaqaa'iqa dhaawacaya danta qaranka ee aan ku jirin Xeerka Qoondada.

**Qodobka 32aad**
**Baadhista Khiyaamada iyo Wax-isdaba arinta**

1. Hanti-dhawraha Guud isaga oo hirgalinaya xeerkan, haddii marka uu Xafiiska Hanti-dhawraha Guud gudanaayo baadhista maaliyadeed, baadhista wax Qabad iyo baadhista waafaqsanaanta Nidaamka (Financial, Performance, and Compliance audits) uu daahfuro danbi ciqaabeed Khiyaamo iyo Wax-isdaba Marin ah (irregularities and Fraud) kaas oo loo hayo Caddeymo ku filan si loo xaqiijiyo, wuxuu Danbiga Ciqaabeed u gudbinayaa Xafiiska Xeer Illaalinta Guud.
2. Marka uu ka helo soo gudbintaas Xafiiska Xeer-illaalinta Guud wuxuu bilaabayaa garmaqalka danbiga Ciqaabeedkaas iyada oo loo raacayo Qodobada 69aad, 70aad iyo 71aad ee Xeerka habka Ciqaabta. Haddii Xafiiska Xeer-illaalina Guud marka uu hubiyo soo gudbinta Xafiiska Hanti-dhawraha Guud uuna u arko in caddeymaha la soo gudbiyey aanay ku filayn inay caddeeyaan in danbi la galay oo uu galay qofka eedesanaha ahi, waxa uu qoral kaga codsanayaa in baadhis dheeraada uu sameeyo Xafiiska Hanti-dhawraha Guud, isaga oo sheegaya nooca caddeymeed ee maqan iyo Duruufaha kale oo ku sababi kara Xafiiska Xeer-illaalinta Guud in uu ka joogsado bilaabida garmaqalka danbi.

**Qodobka 33aad**
**Warbixin Sanadeedka.**

1. Xisaabiyaha Guud wuxuu, afar billood Gudahood, kadib dhamaadka sanad maaliyadeed kasta, saxeexi doonaa una gudbinayaa Hanti-dhawraha Guud xisaabta dawladda ee hay'ad kasta oo dawladeed. Hanti-dhawraha Guud waxa uu warbixin u diyaarinayaa ugu yaraan sanadkiiba hal mar, ama

sida ugu suurto galsan ka dib marka uu sanad maaliyadeedku dhamaado balse aan ka danbayn doonin muddo laba billoood ah ka dib marka uu helo xisaabaadka Xisaabiyaha Guud natiijada baadhista xafiiskiisa/keeda.

2. Hanti-dhawraha Guud waxa uu ku darayaa warbixintiisa: -

   a. Aragtidiisa run iyo cadaaladeed (truth and fairness) ee xisaabaadka hay'ad kasta oo dawladeed sida Dawladda dhexe, Dawladda hoose, Hay'addaha madaxbanaan, Wakaaladaha Madax-banaan, shirkadaha ay Dawladdu ku lug leedahay iyo cid kasta oo xeer jideeyay.

   b. Natiijada wax ku ool ka ah iyo talooyinka taas oo uu u arko in ay tahay in la ogaysiiyo Golaha Wakiilada oo ay ku jiraan:-

      I. Fal kasta ama ka baaqsi kasta (gaabsi) (omission) oo uu sameeyo sarkaal taas oo khuseysa hufnaanta, nidaaminta, iyo baadhista in lacagta loo isticmaalay sida ugu sax roon ee lacagta dawladda lagu maamulay;
      II. Cilad kasta oo lasoo xaqiijiyey oo ku jirta nidaamka dabar gudeed (hubinta gudaha) ee hay'ad kasta oo dawladeed.
      III. Faahfaahinta diwaanada lagama maarmaanka ah ee aan lagu dhaqmin iyo Xeerarka iyo nidaamyada loo adeegsaday kuwaas oon ku filnayn in ay illaaliyaan hantida dawladda, si ay u keenaan hubsiinmo wax ku ool ah oo qiimeyneed, ururin iyo si hufan u qoondaynta dakhliga iyo in la hubsado in kharashka loo adeegsaday sidii loogu talo galay oo kali ah; ama
      IV. Lacag kasta oo la isticmaaley iyada oon dhug loo yeelan dhaqaalaynta (madhxinta) iyo hufnaanta;

3. Illaa iyo xadka ay soo jeedinta talooyinka ku jirto warbixinaha ka yimaada dhinaca Guddida Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka ee uu ansixisiyay Golaha Wakiiladu sanadkii hore ee ay ku dhaqmeen madaxda xisaabaadku.

## Qodobka 34aad
## Warbixinaha Gaarka ah

1. Inta sanadka lagu gudo jiro Hanti-dhawraha Guud wuxuu dooran karaa in uu sameeyo baadhis gaar ah waxanu ikhtiyaarkiisa ku diyaarinayaa warbixino gaar ah marka ay shaqada baadhistu dhamaato.
2. Hanti-dhawraha guud wuxuu u gudbin karaa warbixinaha shaqadan shakhsi ahaaneed Golaha Wakiilada ama warbixinta hawshaasi waxa uu ku dari karaa warbixin sanadeedkiisa.

## Qodobka 35aad
## Soo Hordhigida Warbixinta ee Gudoomiyaha Golaha Wakiilada

Hanti-dhawraha Guud waxa uu soo hordhigayaa warbixintiisa/teeda si toos ah Gudoomiyaha Golaha Wakiilada. Warbixinta waxa ku jiraya faalo khuseysa saraakiisha xisaabaadka, balse Hanti-dhawraha Guud waxa uu lahaan doonaa tifaftirka maamulka warbixintiisa/teeda.

## Qodobka 36aad
## Keenista Warbixinaha Hanti-dhawrka ee Golaha Wakiilada

Shir-gudoonka Golaha Wakiiladu markey helaan warbixinaha Hanti Dhawrka waxay Golaha hordhigayaan Shan (5) maalmood oo ah maalmaha uu goluhu fadhiyo, Warbixinta Hanti Dhawrka waxa loo soo bandhigayaa Gudoomiyaha Golaha Wakiilada marka aanu Goluhu fadhi lahayn, Gudoomiyuhuna waxa uu soo hor dhigayaa warbixintaasi laba todobaad

ama 14 maalmood ka dib marka uu Goluhu dib u fadhiisto.

**Qodobka 37aad**
**U furnaanshaha Dadweynaha ee Warbixinada**

1. Dhammaan warbixinaha uu soo saaro Hanti-dhawraha Guud waxa loo tixgalinayaa qoraal dadweyne marka warbixinaha la soo hordhigo Golaha Wakiilada. Maadaama ay yihiin qoraal dadweynaha u furan waxa la siin doonaa dadweynaha iyada oo qiimaha sawirka laga qaadayo.
2. Hanti-dhawraha Guud wuxuu ka dhigi karaa warbixinihiisa kuwo dadweynaha u furan iyada oo qaab electarooni ah ugu jira mareegaha Internetka.
3. Hanti-dhawrka Guud wuxuu siinayaa nuqulo ka mid ah warbixinihiisa: -
   a) Arkiifiyada dawladda.
   b) Dhammaan maktabadaha dadweynaha iyo jaamacadaha Somaliland.
   c) Hay'addaha warbaahinta qaranka.
   d) Saxaafadda.

4. Hanti-dhawraha Guud ama shaqaalahiisu waxay ka bixin karaan faalooyin iyo waraysiyo saxaafadeed ama war is gaadhsiinta iyaga oo ka hadlaya dulucda warbixin Hanti-dhawr oo la baahiyay.

**Qodobka 38aad**
**Dib u-eegista Gudidda Ilaalinta iyo Dabaglka Hantida Qaranka ee Dhammaan Warbixinaha Hanti-dhawrka**

1. Gudidda Ilaalinta iyo Dabaglka Hantida Qaranka ee Golaha Wakiiladu waxay dib u eegayaan warbixin kasta oo Hanti-dhawrka Guud uu Golaha Wakiilada keeno, dib u eegistani waxa ku jiri kara su'aal weydiinta madaxda xisaabaadka ee hay'addaha dawladda ee ay khuseyso, faahfaahinta Hanti-dhawraha Guud iyo jawaabaha rasmiga ah ee dawlada, Gudidda Illaalinta Hantida iyo Dabagalka

Qaranku waxay sameynayaan talo soo jeedino ku saleysan dib u eegistaasi waxana ay kormeerayaan hirgalintooda, Gudidda Illaalinta Hantida iyo Dabagalka Qaranka iyagoo raacaya Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada.

2. Gudidda Illaalinta Hantida Qaranku waxay leeyihiin awood ay ugu yeedhi karaan madaxda xisaabaadka iyo madaxda kale ee dawladda si wax looga weydiiyo waxbixinta Hanti-dhawraha Guud. Wasaaradaha, la taliyayaashooda, aqoonyahanada kale iyo kooxaha ururada bulshada (civil society groups) si ay hor yimaadaan Gudidda Illaalinta Hantida qaranka, iyadoo gudiddu qaban doonta fadhiyo dadweynaha u furan, waxayna dooran karaan in ay ku qabtaan dhammaan fadhiyadooda ama qayb ka mid ahba fadhiyo gaar ah.
3. Gudidda Illaalinta Hantida Qaranku waxay warbixin u diyaarinayaan Golaha Wakiilada, taas oo ay ku jirito faalooyinka iyo talo soo jeedinta ay sameeyeen kadib markii ay dib u eegeen warbixinaha Hanti-dhawraha Guud.
4. Golaha Wakiiladu wuxuu ka doodi karaa mid kasta oo ka mid ah warbixinaha Gudidda Ilaalinta iyo Dabaglka Hantida Qaranka ka dib dhamaadka dood kasta, Golaha Wakiiladu wuxuu u codeynayaa si loo ansixiyo ama loo diido warbixintaas.

## Qodobka 39aad
## Habsamida Baadhista (Audit Standerd)

Hanti-dhawraha Guud wuxuu go'aansan doonaa heerarka habsami ee baadhiseed ee la raacayo waxanu samayn karaa heerarka habsami-baadhiseed iyo Xeer-nidaamiyaha anshaxa kaas oo gaar u ah baadhida ay sameeyaan xafiiska Hanti-dhawrka Qaranku, iyadoo la raacayo heerarka habsamimada baadhiseed ee guud ahaan la isla qaatay dhinaca dawladda.

a) Heererka habsami ee baadhiseed iyo xeerka anshaxa ee ay faafiyeen hay'adaha caalimaga ah ee Ururka

Hantidhowrayaasha Sare **(INTOSAI)** iyo Gudidda Baadhista iyo Hubinta Heerarka Habsami ee Caalamiga ah ayaa loo adeegsan karaa marka la fulinayo baadhida hay'adaha dawlada dhexe.

b) Heerarka Habsami ee Hanti-dhawrka iyo xeerarka anshaxa ee ay faafiyeen Isu-taga Xisaabiyaasha Caalamiga ah **(IFAC)** ayaa loo adeegsan karaa marka la fulinayo baadhista shirkadaha dawladda heerasha habsami ee kale ee la aqoonsanyahay ama loo baahanyahay ee ay soo saareen ama ay qaateen deeq bixiye maalgalinaya mashruuc ayaa loo adeegsanayaa baadhista mashaariicdooda.

## Qodobka 40aad
## Helidda Qoraalada iyo Hantida Dadweynaha

Hanti-dhawrka Guud iyo shaqaalahiisu waxey leeyihiiin awood aan la xakamayn karin oo ah in ay helaan qoraalada, Koombiyuutarada iyo nidaamyada kale ee macluumaad lagu kaydiyo iyo hantida uu Hanti-dhawraha Guud u arko in ay lagama maarmaan u yihiin hawlihiisa, shaqooyinkiisa, waajibkiisa, iyo awoodihiisa.

## Qodobka 41aad
## Weydiinta Hay'adaha in ay Siiyaan Warbixin

1. Madaxda xisaabaadka iyo/ama cida maamusha hay'addaha dawladdu waxay hubinayaan in Hanti-dhawraha Guud u furan tahay (access) mar kasta oo munaasib ah dukumantiyada hay'addaha la xidhiidha hawl qabadka, shaqooyinka xilgudashada Hanti-dhawraha Guud, waajibaadkiisa iyo awoodihiisa.

2. Shaqaalaha Hanti-dhawraha Qaranka waxa la siinayaa meel macquula oo ku haboon ammaana ah oo ay hawshooda ku fushadaan, madaxda Xisaabaadka iyo/ama cida maamusha hay'addaha dawladda waxa kale oo ay siin doonaan Hanti-dhawrka Guud hadba waqti ama kalal joogto ah xisaabaadka macaamilka

hay'adda dadweyne sida uu cayimo Hanti-dhawraha Guud.

## Qodobka 42aad
## Helida Warbixinaha Hanti-dhawrka Gudaha

Hanti-dhawraha Gudaha (Internal Audit) ee Wakaalada Madax-banaan, Hay'addaha iyo Wasaaradaha Dawladda, waxay nuqul (Copy) ka mid Warbixinahooda baadhiseed ee ah mid caadi ah (3 bilood, 4 bilood, sannad) iyo mid gaar ahaaneedka, waxay u gudbinayaa hanta-dhawraha Guud iyo Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka e Golaha Wakiilada.

## Qodobka 43aad
## Awoodaha Warbixin Raadinta

1. Hawlaha Hanti-dhawraha Guud iyo awoodihiisa ku xusan Qodobkani waxa ay siyaado ku yihiin marka lagu daro Shaqooyinka iyo awoodaha Hanti-dhawraha Guud ee ku xusan Xeerarka kale ee qoran, Hanti-dhawraha Guud wuxu ogaysiin qoraal ah ku awoodsiin karaa qof ***"qofka la awood siiyay"*** in uu guto hawlaha ku xusan Qodobkani.

2. Ujeedo baadhiseed awgeed, Hanti-dhawraha Guud waxa uu ogaysiin qoraal ah, ku amri karaa qof in uu qabto dhammaan ama wax ka mid ah kuwan soo socda:
    a. In uu siiyo Hanti-dhawraha Guud xog kasta ama sharaxaad kasta oo uu u baahanyahay.
    b. In uu ka qayb galo cadaymana siiyo Hanti-dhawraha Guud ama qofka la awood siiyay.
    c. In uu tuso Hanti-dhawraha Guud qoraal kasta oo uu hayo ama maamulo qofkaasi.

3. Hanti-dhawraha Guud waxa uu ku amri karaa:
    a. Warbixinnta, faahfaahinta ama jawaabaha su'aalaha lagu siiyay af ahaan ama qoraal

ahaan (sida uu Hanti-dhawraha Guud dalbado);

b. Warbixinta, sharaxaadaha ama jawaabaha su'aalaha la xaqiijinayo ama la isku dhaarinayo ama la isku xaqiijinayo in warbixinta ama cadaynta uu qofku bixiyay in ay tahay mid run ah;

4. Hanti-dhawrka Guud ama qofka la awood siiyay ayaa maamuli doona dhaarta ama xaqiijinta ujeedooyinka Qodobkani.

5. Qofka ka qeyb-galkiisa loo baahan yahey sida ku cad farqada 1aad ee Qodobkan wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo kharashaadka ka baxay ee uu Hanti-dhawraha Guud u arko mid macquul ah.

## Qodobka 44aad
## U Ogolaanshaha Xisaabaadka, Warbixinaha, Lacagta iyo Hantida

1. Sabab baadhiseed awgeed, Hanti-dhawraha Guud ama qofka la awood siiyay waxa uu xaq u leeyahey in uu si dhamaystiran oo xor ah u helo waqtiyada macquulka ah: -

   a. Dhammaan xisaabaadka, warbixinaha, qoraalada, nidaamyada (systems) iyo diiwaanada uu Hanti-dhawraha Guud uu u arko in ay khuseeyaan baadhista; ama
   b. Lacagta dawladeed ama lacag kale;
   c. Hanti dawladeed ama hantiyo kale Taasi oo ah ama noqon karta qof mid uu hayo. Hanti-dhawraha Guud ama qofka kale ee la awood siiyay wuxuu ka sameysan karaa nuqul (copy) ama qeyb ka qaadan karaa sida xisaabaad, macluumaad, waraaqo ama diiwaano.

2. Iyada oo la raacayo nuxurka farqada 1aad ee qodobkan, Hanti-dhawraha Guud waxa amri karaa in la baadho iyo in hadhaaga laga qaadi karo wax kasta

oo gacanta ugu jira qofka baadhista lagu sameynayo ama xafiis kasta oo qof kale iyada oon wax kharash ah aan lagu bixinayn fulinta hawshaasi.

3. Iyada oo la raacayo farqada 6aad ee Qodobkan, Hanti-dhawraha Guud ama qofka uu awood siiyay waxa uu waqti kasta oo macquula galayaa oo ku sugnaanayaa dhismayaasha si uu u fuliyo awoodaha Qodobkani.

4. Qofka iska hortaaga Hanti-dhawraha Guud ama qofka loo awood siiyay in uu galo dhismayaasha sida ku cad qodobkani wuxuu galey dambi waxana lagu xukumayaa xadhig aan ka badnayn lix bilood illaa shan sano iyo qodobada Xeerka Ka Hortaga Ku Tagri Falka Hantida Qaranka iyo La Dagaalanka Musuqmaasuqa (Xeer Lr. 38/07).

5. Haddii qof la awood siiyay galo ama soo jeediyo in uu galo goobaha ku xusan farqadani, qofka dagani waa in uu siiyaa qofka la awood siiyay dhammaan tasiilaadka macquulka ah si uu si hufan u adeegsado awoodaha ku xusan qodobkani.

6. Qofka la awood siiyay xaq uma laha in uu galo ama joogo goobta/dhismaha haddii uu ku guul daraysto in uu soo saaro amar qoraal ah oo uu ku waydiisto qofka degan goobtu in uu tuso si uu u xaqiiqsado in galitaankaasi la ogolaaday.

## Qodobka 45aad
## Kala mudnaanta Bixinta Xog iyo Xuquuqaha kale

1. Qofku kuma marmarsiyoon karo in siinta warbixinta ama faahfaahinta, ama ka jawaabida su'aasha ama soo saarida qoraalka sida ku cad Qodobka 44aad isaga ku marmarsoonaya in warbixintaasi, sharaxaadaasi, ama jawaabtaasi, ama soo saaridaasi qoraalku, ay u muuqato mid qiraal danbi ku noqonaysa qofka.

2. Qofku waa in uu bixiyaa warbixinta ama sharaxaada, kana jawaabaa su'aasha ama soo saaraa cadaynta sida uu ku waajibinayo Qodobka 44aad, haba jirto inuu yahey sir ama uu yahey waajib qofku in uu illaaliyo sida uu waajibinayo xeer kale oo aanu qofku dhuceyn dambi sida xeerkaas kale ku waajibiyay.

3. Haddii qof uu warbixin siiyo ama sharaxaad ama ka jawaabo su'aal ama soo saaro qoraal sida ku cad Qodobka 44aad, looma qaadan doono in uu noqdo cadayn ku lid ah qof kaasi garmaqal kasta oo madani ama ciqaab ah labadan midkoodna: -
   a. Siinta warbixin ama sharaxaad, ka jawaabista su'aal ama soo saarida qoraal; ama
   b. Wax kasta oo lagu helo natiijo toos ah ama aan toos ahayn oo ah bixinta warbixin ama sharaxaad, ka jawaabis su'aal ama soo saaris qoraal, marka laga reebo:-

      I. Garmaqalada ku saabsan wixii lid ku ah qodobkan;
      II. Garmaqalada sida ku cad Xeerka Ciqaabta.

**Qodobka 46aad**
**Ogeysiinta Masuulka hawlgalku khuseeyo**

Hanti-dhawraha Guud waa inuu ogeysiiyaa Masuulka ay khuseyso dhammaan arrimaha ka soo baxa hawl galka Hanti-dhawraha Guud iyo adeegsiga awoodaha Hanti-dhawraha Guud ee ku xusan Xeerkani ama xeer kasta oo Kale kaas oo uu u arko in ay leedahay ahmiyad ku filan si uu ugu cadeeyo sameynta hawlgalkaas.

**Qodobka 47aad**
**Jawaab Celinta Qorida Warbixinaha**

Marka la soo gabogabeeyo shaqada Hanti-dhawrka, Hanti-dhawraha Guud waxa uu siin doonaa sarkaalka xisaabeed ee ay khuseyso ama masuulka xukuma

haay'adaasi warbixin diyaarsan oo ay ku jiraan natiijadii iyo talo soo jeedinta Hanti-dhawr, sarkaalka xisaabaadka ama cidda haysata hay'addaasi waxa uu ku siinayaa jawaab qoraal ah Hanti-dhawraha Guud muddo 30 casho gudahood ah.

**Qodobka 48aad**
**Faafinta Xogta**

Qofna isaga oon ka haysan ogolaansho qoraala Hanti-dhawrka Guud ma faafin karo ama ma daahfaydi karo warbixin lagu helay iyada oo lagu gudo jiro hawl baadhiseed oo khuseysa qof (oon ka ahayn marka uu gudanayo waajibaadkiisa ama marka si sharci looga baahanyahay in uu sidaasi yeelo maxkamadina ka dalbato) Hanti-dhawraha Guud oo kali ah ayaa ka dib marka uu dhug u yeesho danta guud iyo waajibaadka mihnada Hanti-dhawrenimo ee khuseeya sir ahaanshaha warbixinta waxanu go'aasan karaa warbixintee ayaa si habboon loo faafin karaa.

## QEYBTA V

## MAALIYADDA IYO KHARASHAADKA XAFIISKA HANTI-DHAWRKA QARANKA

**Qodobka 49aad**
**Miisaniyadda Hanti-dhawraha Guud**

Miisaaniyadda Xafiiska Hanti-dhawraha Qaranka waxa ku jiri doona: -

a) Miisaaniyada uu u ansixiyo Golaha Wakiiladu
b) Deeqaha iyo mucaawinooyinka uu Wasiirku u ansixiyo, iyo
c) Lacagta ka soo xaroota Maalgashiga ee ku xusan qoddobka 53aad".

**Qodobka 50aad**
**Kharashaadka Hanti-dhawraha Guud**

Dhammaan lacagaha ay ansixiyeen Golaha Wakiiladu si loogu baxsho kharashaadka la gali karo marka la gudanayo hawlaha xafiiska Hanti-dhawraha Guud ama in lagu socodsiiyo nuxurka Xeerkan waxa uu noqon

doona Kharash toos ah oo laga saaro Sanduuqa (Kaydka) Dakhliga (Consolidated Fund).

**Qodobka 51aad**
**Awood ku soo Rogidda Ajuurada (fees)**

1. Hanti-dhawraha Guud waxa uu ku dalici karaa ajuuro marka ay baadhayaan xisaabaadka hay'ad kasta oo guud ama hay'addaha caalamiga taas oon ka helin lacago Sanduuqa (kaydka) Qoondada ee Qaranka.
2. Wixii ajuuro ah ee lagu helo sida ku cad Qodobkan waxa lagu darayaa Sanduuqa (kaydka) Dakhliga Guud.

**Qodobka 52aad**
**Xisaabta Baanka (Qandiga Baanka)**

Hanti-dhawraha Guud wuxu furi doon kuna shaqayn doonaa xisaab baan (qandi baan) ee lagama maarmaanka u ah si loo hirgasho shaqooyinka Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka waxana lagu shubi doonaa dhammaan lacagaha laga helay dawladda ee waafaqsan nuxurka Xeerkan.

**Qodobka 53aad**
**Maalgashiga Lacagaha Dheeraadka Ah**

Maalgashiga waxa sameyn kara Baanka dhexe, ka dib marka uu ogolaasho ka helo xafiiska Hanti-dhawraha Guud, waxaana loo marayaa maalgashiga lacagtaas si waafaqsan Xeerka maalgashiga Qaranka ee Guddaha.

## QEYBTA VI

## LA XISAABTANKA XAFIISKA HANTI-DHAWRKA QARANKA

**Qodobka 54aad**
**Soo Jeedinta Miisaaniyadda iyo Qorshaha Sanadlaha ah**

Iyada oo la raacayo Xeerka Maamulka Miisaaniyada Qaranka Xeer Lr. 75/2016 ugu yaraan 90 cisho ka hor bilowga sanad maaliyadeed kasta Hanti-dhawrka guud waxa uu diyaarinayaa una soo gudbinayaa Gudidda Illaalinta iyo dabagalka Hantida Qaranka qorshe sanadeed qabyo ah kaas oo sharaxaya hawl qabadka shaqo ee uu soo jeediyey Hanti-dhawraha Guud sanadkaas oo ay la socoto miisaaniyad faahfaahsan oo lagu fulinayo qorshe sanadeedkaasi.

## Qodobka 55aad
## Dib U-eegista Qorshe Sanadeedka la soo Jeediyey iyo Miisaaniyadda

1. Haddii ay ku qanci waayaan Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku warbixinta Hanti-dhawraha Guud waxay dalban karaan Hanti-dhawrayaal ka madax-banaan Hanti-dhawrka Guud, si ay u iftiimiyaan wixii khaldan, waxaana Hanti-dhawrayaasha la igmaday ugu soo gudbiyaan muddo aan ka badanayn 60 maalmood Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka ee Golaha Wakiilada.

2. Haddii ay cadaato warbixinta uu soo gudbiyay in ay khalad ahayd ama uu wax qarinayay si ku talo gal ah, Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku waxay natiijadda baadhista u gudbin doonaan Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka, kaas oo dalban doona xil ka qaadista Hanti-dhawraha Guud, isla markaana hor geyn doona Maxkamada awood u leh.

## Qodobka 56aad
## Ansixinta Miisaamiyadda iyo Qorshe Sanadeedka

1. Kadib marka ay dib u eegaan faalooyinka Gudidda Illaalinta Hantida qaranka, waxa uu gabo-gabeyn doonaa qorshaha sanad laha ah iyo miisaaniyadda sanadlaha ah si ay u ansixiyaan Gudidda Ilaalinta iyo

Dabaglka Hantida Qaranka looguna Gudbiyo Ansixinta Wasaaradda Maaliyadda Miisaaniyadda Hanti-dhawraha Guud waxa uu ka mid noqon doonaa Miisaaniyadda Dawladda.

2. Hanti-dhawraha guud wuxuu xaq u leeyahey in uu khudbad u jeediyo Gudidda Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka ama si toos ah Golaha Wakiilada haddii aaney ansixin miisaaniyad sanadeedka xafiiska Hanti-dhowrka Dawladda iyada oon waxba laga badalayn.

**Qodobka 57aad**
**Warbixinaha Mudaalaha ah ee Gudidda Illaalinta Hantida Qaranka**

Hanti-dhawraha Guud waxa uu diyaarin doonaa una gudbin doonaa Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka warbixinta waxqabadka iyo hawlgalada Xafiiska Hanti-dhawrka Guud muddo saddex bilood ah.

**Qodobka 58aad**
**Gudbinta Warbixinta Wax Qabad iyo Tan Xisaabaadka**

1. Hanti-dhawraha Guud wuxuu u gudbinayaa sanad kasta Gudidda Ilaalinta iyo Dabaglka Hantida Qaranka nuqul ka mid ah wax qabadka sanadka iyo warbixinta baadhista xisaabeed ee khuseysa Xafiiska Hanti-dhawrka Dawladda.

2. Warbixintan waxa ku jiriaya illaa iyo xadka uu Hanti-dhawraha Guud gaadhay qorshihiisii sanad laha ahaa iyo warbixinaha maaliyadeed ee la baadhay ee Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka.

**Qodobka 59aad**
**Baadhis Madax Banaan**

Gudidda Illaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranku waxay sanad maaliyadeed kasta, u magacaabayaan

Hanti-dhawr Madaxbanaan si uu u baadho ugana warbixiyo warbixinaha nuqulada maaliyadeed, xisaabta (account) iyo warbixinaha kale ee la xidhiidha gudashada hawlahiisa Hanti-dhawr Guud ee sanadkaas, waxayna noqon kartaa in qandaraas lagu siiyo shirkad hanta-dhawr caalami ah.

**Qodobka 60aad**
**Meeqaamka Hanti-dhowrka Guud**

Iyada oo la fulinayo nuxurka baadhista madaxa banaan, Hanti-dhawraha Guud iyo Xafiiska Hanti-dhawrka waxa loo tixgalin doonaa in uu yahay Hay'ad dawladeed oo Xeerkani lagu jideeyay, Shirkada madaxa banana ee sidaasi lagu magacaabayna waxa ay fulinasaa nuxurka baadhiseed iyadoo leh awood la mid ah tan Hanti-dhawraha Guud.

## QEYBTA VII

## DANBIYADA IYO CIQAABAHA

**Qodobka 61aad**
**Danbiyada iyo Ciqaabaha**

1. Qofku waxa uu galay danbi haddii: -
    a. Isaga oon haysan sabab sharci macquula ama cudurdaar, si kas ah uga illaaliya Hanti-dhawraha Guud ama qof kasta oo Hanti-dhawraha Guud uu igmaday si uu u fuliyo shaqooyinkiisa ku xusan Xeerkani;
    b. Isaga oon haysan cudur daar macquula, diida ama ku guul daraysta in uu waafaqo amar kasta ama tilmaan kasta oo uu siiyo Hanti-dhawraha Guud.
    c. Isaga oon haysan sabab sharci macquula ama cudurdaar, diida ama ku guul daraysta in uu siiyo Hanti-dhawraha Guud ama qof kasta oo uu awood siiyay Hanti-dhawraha Guud in uu hello buugta, Diwaanaha, baaqiyada qoraalada kale, warbixinta lagu xusay Qodobka 44aad; ee xeerkan

   d. Isaga oo ogeysiiya Hanti-dhawraha Guud qoraal been abuura ama la macmalay ama sameeya warbixin been ah isaga oo ujeedadiisu tahay in uu khiyaameeyo ama marin habaabiyo Hanti-dhawraha Guud ama qof kasta oo kale oo uu awood siiyay Hanti-dhawraha Guudi.

2. Qofku waxa uu galay danbi haddii isaga oo u shaqaynaya Xafiiska Hanti-dhawrka Guud uu:-
   a. Si khaldan u adeegsado warbixin kasta oo uu helay isaga oo fulinaya hawl baadhiseed ama wax ku xusan Xeerkani.
   b. Si qarsoodi ah ula shirqoola sarkaal xisaabeed ama Hanti-dhawre gudeed ama sarkaal kale oo dawladeed iyada oo fulinaya hawshooda ku xusan Xeerkani in ay ka baaqsadaan (ka tagaan/saaraan) (omit) waajib ama sameeyaan ficil, haddii ka baaqsigaasi ama galidaasi ay horseedaso in lacag dawladeed lunto.

3. Qofka lagu xukumo danbi sida ku cad Xeerkani waxa uu mutaysan doonaa, xadhig u dhaxeeya lix bilood illaa shan sano iyo qodobada Xeerka Ka Hortaga ku Tagrifalka Hantida Qaranka iyo La Dagaalanka Musuqmaasuqa (Xeer Lr. 38/07).

## QEYBTA VIII

## QAYBO KALA DUDUWAN

### Qodobka 62aad
### Dhawrsanaanta Warbixinta Hanti-dhawraha Guud ee Garmaqalada Maxkamadda

1. Dhammaan warbixinaha Hanti-dhawraha Guud ee loo daabacay si loogu gudbiyo Golaha Wakiilada waxa loo tixglainaaa Warbixin Golaha Wakiiladu leeyahay waxana ay yeelanayaan xasaanada ay leeyihiin warbixinaha Golaha Wakiiladu.
2. Si looga gaashaanto shakiga, wax garmaqala madani ah ama ciqaab ah laguma furi karo Hanti-dhawraha

Guud iyada oo loo aaneynayo warbixin kasta oo isagu daabacay si ay uga faa'iideeyaan Golaha Wakiiladu.

**Qodobka 63aad**
**Ka Illaalinta Hanti-dhawraha Guud iyo Shaqaalihiisa Masuuliyada Danbi**

Hanti-dhawraha Guud iyo shaqaalaha xafiiska Hanti-dhawrka Qaranku ama qofka amarkooda ku socdaa shakhsi ahaan ugama masuul aha wax fal ah ama ka baaqsasho fal waajib ah oo uu falay ama ka baaqsaday in uu falo isaga oo si niyadsan u fulinaya shaqooyinka Xafiiska Hanti-dhawraha Qaranka.

**Qodobka 64aad**
**Gaadhsiinta Qoraalada ee Xafiiska Hanti-dhawraha Guud**

Ogaysiin kasta ama qoraal kasta oo loogu talagaley Hanti-dhawrka Qaranka waxa la keeni doonaa Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka, ama waxa loogu soo diri doonaa boosta ka diiwaangashan xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka.

**Qodobka 65aad**
**Sareynta Xeerka**

Xeerkani waa mid leh saraynta dhammaan Xeerarka kale ee jira ee la xidhiidha Xafiiska Hanti Dhawrka Qaranka ama khuseeya awoodaha iyo shaqooyinka Hanti-dhawraha Guud xeer kasta oo ay iska hor yimaadaan Xeerkana waxa loo badalay in uu waafaqo qodobada Xeerkan.

## QAYBTA IX

## QODOBADA KU MEEL GAADHKA AH IYO NASAKHAADAHA IYO QODOBADA LA SII DHAWRAYO

**Qodobka 66aad**
**Wareejinta Hantida iyo Qaamaha**

Dhammaan hantida iyo qalabka uu leeyahay Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranku inta uusan dhaqan galin xeerkan waxa ka dib dhaqangalkiisa ay ahaanayaan qaar uu leeyahay Xafiiska Hanti-dhawraha Qaranku iyada oo ay lahaanayaan dhamaan qaamaha, waajibaadada iyo amaano haynta kale ee saamaynaya hantidaasi.

**Qodobka 67aad**
**Shaqaalaha Xafiiska Hanti-dhawraha Guud**

1. Dhaqan galka Xeerkani:

   a. Dhammaan shaqaalaha, ka hor intaanu dhaqan galin xeerkani ahaa shaqaale Xafiiska Hanti-dhawrka Qaranka shaqaalinimadoodaasi way u sii socon doontaa.
   b. Shuruudaha iyo macluumaadka/xaaladaha ay ka midka yihiin mushaharka ee uu qofka lagu xusay farqada hore xaraf (a) loo shaqaalaysiiyay ka dib marka uu bilaabmo dhaqangalida Xeerkani kama mudnaansho badan karaan kuwa uu xafiisku siiyay qofkaasi intii aanu bilaabmin dhaqangalka Xeerkani.
   c. Hirgalinta Xeerkani ma joojin karto ama ma kala goyn karo xidhiidhka shaqaalenimo ee dadka;

2. Iyada oo la raacayo farqada 1aad xarafka (b) ee Qodobkan, shuruudaha iyo macluumaadka/xaaladaha lagu xusay farqada 1aad way kala duwanaan karaan ka dib marka uu hirgalo Xeerkani.
3. Xeerkani ma saamayn doono gunada hawlgab iyo xuquuqda is gaadhay ee qofka lagu xusay farqada 1aad.

**Qodobka 68aad**
**Xeer-nidaamiye**

1. Hanti-dhawrka Guud, marka ay Golaha Wakiiladu ansixiyo wuxuu sameyn karaa xeer niddaamiyayaal guud isagoo dhaqan galinaya Xeerkan iyo waajibaadkiisa maamul iyo fulineed.
2. Hanti-dhawraha Guud wuxuu soo saari karaa xeer-tilmaame, talo bixin iyo nidaam la raaco hadba sida ay baahidu noqoto si uu u sharraxo ama tilmaan uga bixiyo qaabka fulinta Masuuliyadaha iyo waajibaadka

uu xeerkani saaray.

**Qodobka 69aad**
**Nasakhaado iyo Dhawris**

1. Qaybta II ee Habraaca Maaliyadda iyo Xisaabaadka ee Dawladda Digreeto Lr. 1996 (Xeer Lr. 86/96) kaas oo ina siinaya diyaarinta, baadhista iyo fatashaada xisaabaadka waa la nasakhay marka laga reebo Qodobka 31aad.

2. Iyada oon loo eegayn nasakhaada ku cad farqdani (1), baadhis kasta ama fatashaad kasta oo ku saabsan xisaabaadka dawladda ama xisaabaadka urur dawladeed oo lagu sameeyay qaybtaasi la nasakhay ee Qaybta II iyo Qodobada 32 iyo 33 Habraaca Maaliyadda iyo Xisaabaadka ee Dawladda Digreeto (Xeer Lr. 87/96) waxa ay u sii jiri doonaan sidii lagu aasaasay Xeerkan

**Qodobka 70aad**
**Dhaqan Galka Xeerka**

Xeerkani wuxuu dhaqangalayaa Marka Golaha Wakiiladu Ansixiyo Madaxweynuhuna saxeexo dhaqangalintiisa.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**

**Baashe Maxamed Faarax**
**Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ahna Ku-simaha Gudoomiyaha G/Wakiilada JSL.**